

## Axmed Faarax Cali "Idaajaa"

### Qoristii Af-soomaaliga iyo ururinta suugaantiisa: kaalintii Shire Jaamac Axmed

**M**arkii la soo qaado taariikhda casriga ah ee qoraalka Af-soomaaliga waxaa jira rag magacyadoodu ay markiiba maanka ku soo dhacayaan. Cilmibaareyaal badani siday qabaanna, raggaas kuwa ugu horreeya ayaa, Allaha u naxariistee, waxaa ku jira Shire Jaamac Axmed. Waxaa lagu maamuusaa hawlihii waaweynaa ee uu ka qabtay dabo-qabashada dhaqankeenna iyo horumarinta qoraalka afkeenna.

Xusuusta qofkii yiqiinney waxaan marnaba ka baabbi'i karin hawlahaas mintidnimadii iyo miigganaantii uu ku soo qabtay; labadaas oo ah tilmaamihii uu lahaa kuwii ugu waaweynaa, shakhsiyad ahaanna loo ogaa. Noloshiisa inteedii badnayd ayaa la hubaa inaanu ka shaqayn wax aan ahayn sidii Af-soomaaliga loo qori lahaa; taas oo waafaqsanayd, kuna xusnayd qodobka 5d ee Axdiga Xisbigii SYL<sup>86</sup>.

Iyada oo aanay ammaan iga ahayn ayaan ku doodi karaa inuu Shire ka mid ahaa dad Soomaalida dhexdeeda waayadan ku tiro yar oo mar walba u diyaar ah danta guud inay u burburaan, goor kastana ka hor-mariyaan middooda u gaarka ah. Bartamihii kontomeeyadii qarnigii 20d ayuu ku qancay haddii aan Afsoomnaalifga la qorin oo ardada Soomaalida aan isaga wax lagu barin, ummaddeennu inay dhinaca maskaxda gumeysi kaga jiri doonto, xataa, haddii ciidan iyo maamul ahaan, gumeysteyaashu ay 1960kii dalka shadaaftooda ka qaataan.

Marka laga reebo kooxo aan badanayn oo dhaxalka hiddahoodu la liito, guud ahaan, Soomaalidu iskuma diiddaneyn in afka la qoro. Su'aashuse waxay ka taangneyd, 'sidee loo qoraa ama xarfahee lagu qoraa?' Maalmahaas waxaa goobta yiilley faro 18 gaaraayey oo cilmibaareyaal Soomaaliyeed ay afka u habeeyeen sida Farsoomaalidii Cismaan Keenadiid<sup>87</sup>, xarfihii Carabiga ahaa ee uu Ibraahin

86 SYL (Somali Youth League): Xisbigii gobannimaddoonka ahaa ee 1943kii Xamar lagu asaasay, halgankiisiina ay Soomaalida qaarkeed xornimadeeda ku heshay sannadkii 1960kii.

87 Allaha u naxariistee, waxa uu Cismaan Yuusuf soo saaray 1922kii; isaga oo markaaas Hobyo iyo Ceelhuur ku noolaa. Waxay ahayd Xisbigii SYL far uu aqoonsaday, dhanbaalladana isugu diri jirey.

Xaashi qaadashadooda u halgamaayey, tii Laatiinka ahayd ee uu Shire Jaamac u ol'olaynaayey. Xuseen Shiikh Axmed 'Kaddare' iyo rag kale ayaa iyaguna soo if-bixiyey faro kale oo kuwaas hore ka duwan.

Xarfaha Laatiinka ahi<sup>88</sup> ayuu Shire aad ugu qancayee; taasna waxaa ka soo gaarey dhibo badan oo Soomaali iyo shisheeyeba ay u geysteen. Waxaa ka dhaadhacday, waayuhuna ay u rumeyeen, cilmi ahaan, inay xarfahaasi yihiin kuwa ugu habboon ee dhawaaqyada Af-soomaaliga loo adeegsan karo. Ha yeeshi, dan laga lahaaba, fikraddaas iyada ah waa lagu canbaareeyey, waa lagu dhagxiyey, waa lagu caayey, minankiisi baa lagu weeraray, waxaana tuhun la geliyey muslinnimiidiisa!

Dadweynihii Allihiis Alle ahaa ayaa waxaa afka loogu tiray, 'Laa-tiin waa Laa-diin!' iyo "waa far-gaalaad!"; halkudhegyadaas oo ay inta badan hirgeliyeen kooxihi xarfaha Carabiga ah taageeri jirey iyo, weliba, Dawladaha Carabta qaarkoodii iyaga wax la wadey oo faroggelin xoog leh ku hayey farta ay Soomaalidu afkeeda ku qoran doonto. Waxay ku andacoona jireen xarfaha laatiinka oo la qaataa inay Soomaalida diinteeda ka fogeyneyso.

Dooddaas iyada ah si aad ah ayuu Shire ugu gacan-sayray, dabadeedna wargeesyadii Aftalyaaniga Xamar kaga soo bixi jirey midkood ayuu ku faafiyey maqaallo uu ku diiddan yahay. Maqaalladaas waxaa, malaha, ugu caansanaa kii ku magacawnaa, '*Non dobbiamo odiare l'Occidente e la scrittura Latina*'<sup>89</sup> oo la macne ah, 'Ma aha inaynu necbaanno Reer-galbeedka iyo farta Laatiinka'.

Wuxuu halkaas Soomaalida ugu caddeeyey Indoneesiya, Turkiya iyo dalal kaleba inay qoraalka afkooda u adeegsadaan xarfo aan Carabi ahayn oo Laatiinku ku jiro, isla markaasna aan muslinnimadooda shaki la gelin karin. Wuxuu kaloo maqaalkaas ku sheegay, haddaynu farta Laatiinka qaadanno, aqoonta badan ee afafka Reer-galbeedka ku qoran inaynu si fudud ugu dhaadhici karayno, isla markaasna aynaan u baahan doonin teebab iyo makiinado hor leh oo wax lagu daabaco. Wuxuu ku soo ebyey, "Dhaqanka wax-gumeysiga ee Reer-galbeedku waa wax, waxbarashada iyo ilbaxnimadooduna waa wax kale oo aynu uga faa'ideysan karayno sidaynu imminkaba uga faa'ideysanno tabarta korontada oo laga war-

<sup>88</sup> xarfaha Roomaankana waa lagu magacaabaa.

<sup>89</sup> Wuxuu maqaalku ku soo baxay wargeyskii Dawladda ee Aftalyaaniga lagu soo saari jirey, laguna magacaabi jirey Corriere Della Somalia (Xamar, 16kii Maarsio, 1957).

qabo inay tahay wax ay maskaxda Reer-galbeedku curisay". Sidaas iyo si la mid ah ayuu ugu caqli-celin jirey dadweynihii Soomaaliyeed ee saamaynta maankiisa loo tartamaayey.

Xukuumadihi Soomaaliya ee gobannimadii ka dib hoggaanka dalka qabtay, lagana rabey isla markiiba inay far-u-yeelidda afka go'aan ka gaaraan, way ka gaabiyeen. Siyaasadihi wax-kala-jiidashada ee Xisbiyada ayay arrintaas ahmiyadda weyn lihi ku dhex-luntay. Farihi goobta yilley waa la kala dooran waayey. Waxaa ugu wacnaa, 'Mudane hebel tixgeli iyo Dawlad hebla' yaan laga caraysiin!'.

Si kastaba ha ahaatee, 1961kii ayay Xukuumaddii Ra'iisul-wasaare Cabdirashid Cali Sharma'arke waxay magacawday Guddi ka kooban aqoonyahanno wada Soomaali ahaa oo, Allaha u naxariistee, Muuse Galaal uu guddoomiye u ahaa. Xilka la saaray wuxuu ku koobnaa inay ka soo taliyaan arrinta qoraalka afka iyo farta loo adeegsan karo.

Warbixintii uu Guddigaasi soo saaray iyo 1966kii mid uu soo gudbiyey Guddi ka socdey Qarammada Midoobey, laanteeda Sayniska iyo waxbarashada ee UNESCO loo yaqaan waxay labaduba ku taliyeen in Af-soomaaliga lagu qoro far-Laatiinta uu Shire afka u habeeyey. Maxay, haddaba, sababtu ahayd? Sababha xagga farsamada xiriirka la leh ka sokoow, go'aammada caynkaas ah waxaa lagu saleeyey Shire oo maaro u helay raggii isaga ka horreeyey ee Laatiinka adeegsan jirey wax ay maaro u waayeen. Wuxuu, markii ugu horreysey, adeegsadey xarfaha x, c, dh (d+h) iyo hamzada; kuwaas oo uu u isticmaalay shibbaneyaasha Af-soomaaliga ee kala ah 'x'da, 'c'da, 'dh'da iyo hamsada<sup>90</sup>.

Warbixinadii labadii Guddi waxba kama baddelin go'aan-li'idii Xukuumadihi Soomaaliya ee Xisbigii SYL laga dhisi jirey. Hase ahaatee, Shire wuxuu ka sii qaaday mintidnimo iyo miigganaan hor leh. Bartamihii qarnigii 20d lixdannadii ayuu go'aansaday inuu Soomaalida tuso oo taabsiyo farta uu afka u habeeyey inay dhaqangal noqon karto. Waa markii uu bilaabay soo-saarista joornaalkii (majallad) "*Iftiinka Aqoonta*" uu u bixiyey ee marsoobbaxa ahaa<sup>91</sup> (periodical). Joornaalkaa ayuu ku soo bandhigi jirey gabayo, maahmaaho iyo sheekooyin Soomaaliyeed oo aan isaga ka hor weligeed cidi qorin. Sidaas darteed, boqollaal

<sup>90</sup> Arag qoraalka Dr. Georgi Kapchits ee ku magacaban 'Nin aan laga horreyn', uuna ka jeediyeen xuska 40-guuradii qoraalka Af-soomaaliga, London, 2012.

<sup>91</sup> Mar buu toddobaadle ahaa, mar dhexe afar-ijo-tobnaadle, markii dambena bille ayuu ahaa.

dhallinyaro ah oo aan ku jirey ayaa joornaalkaasi wuxuu ku qanciyey suugaanta iyo murtida Soomaalidu in aanay waxba u ogeyn kuwa Reer-galbeedka iyo Carabta ee muddada dheer qornaa. Waxay ahayd shaqo aad u dhib badan, maxaa yeelay waxay ahayd mid uu nintooxsi ku qaban jirey.

Sannadkii 1936kii ayuu Shire Wardheer ku dhashay. Gudaha dalka ka sokoow, wuxuu culuunta afafka iyo suugaamaha ka raacday Jaamacado ku kala yaal dalalka Masar, Ingiriiska iyo Ruushanka. Guddigii Af-soomaaliga ee Xukuumaddii Kacaanku ay magacawday (1971) ayuu Shire xubin ka noqday, bishii Oktoobar '72kiina wuxuu u soo joogey iyada oo qoraalkii afka loo doortay fartii uu isagu u habeeyey oo aan waxba laga reebin, waxna lagu kordhin. Waxay ahayd sannadihi lixdannadii qarnigii 20d isla fartii uu isagu "*Iftiinka Aqoonta*" ku qori jirey (eeg halka lifaaqa qoraalkan). Ha yeeshi, go'aankaas la qaata sin magaciisa looguma xiriirin, loogumana xusin! Wuxuu filaayey, heer qaran ahaan, in loo aqoonsado qaybtii uu ka soo qaata xoraynta maskaxda ummaddiisa iyo dedaalkii uu ka muujiyey bedbaadinta suugaan iyo murti badan oo, isaga la'aantiis, aan maanta gacanteenna ku jirteen.

1973kii ayuu Agaasime Guud ka noqday Akademiyihii Dhaqanka ee dhammaadkii sannadkaas la abuuray. 1978kii wixii ka dambeeyeyna wuxuu ku biiray hawladeennadii Diblomaasiyadda Soomaaliyeed, isaga oo noqday ku quaybsanaha Arrimaha Dhaqanka ee Safaaradihi uu dalku ku lahaan jirey Qaahira iyo Stockholm.

Intii Af-soomaaliga la qoray ka dib, buugaagtii uu Shire soo saaray, lana daabacay waxaa ka mid ahaa laba sheeko oo mid la oran jirey *Halgankii Nolosha*<sup>92</sup>, midda kalena *Rooxaan*. Wuxuu kaloo soo saaray buug ku saabsan *Naxwaha Af-soomaaliga* oo ah naxwaha madiga ah ee Af-soomaaliga ku qoran, aqooniyahan Soomaali u dhashayna uu dejiyey ama, ugu yaraan, isaga oo daabacan, inta aan og nahay, la faafiyey<sup>93</sup>.


<sup>92</sup> In kastoo aan isaga laga werin, haddana waxaa loo malaynayaa in buuggani ku saabsan yahay taariikhda noloshiisa.

<sup>93</sup> Intii uu qoraalkani soo baxay ka dib ayaa waxaa la soo saaray buug-naxweed uu qoray Buuni: Cabdalla Cumar Mansuur. Waxaa la yiraahdaa: Barashada Naxwaha Af-soomaaliga (1999).

Bilawga bishii Jannaayo, 1999kii ayuu ku geeriyoodey magaalada Stockholm ee dalka Sweden; isaga oo ku faraxsan, intii uu noolaa inuu Ummaddiisa wax u qabtay, dedaalkiisiina uu miro-dhalay. Dhinaca kalese, wuxuu dhintay isaga oo *abaal-dhac qaran* tirsanaaya; taas oo iyadana uu ku gar leeyahay!

Ugu dambaysta, waxaan ku laab-qaboobahay markii ay Soomaalidu qarannimadeeda soo ceshato, markii ay dib u soo kacdo, markii ay taariikhda afkeeda dib u milicsato; markaas oo qura inuu Shire heli doono maamuuska uu mudan yahay ee markuu noolaa uu heli waayey.

### Lifaaq: Laba bog ka mid ah Joornaalkii "Iftiinka Aqoonta":



### Raadraac

- Andrzejewski, B. W., iyo Lewis, I. M., 1964. *Somali Poetry*, Oxford: Clarendon Press.
- Somali Government, 1961. "The Linguistic Report, Mogadishu."

- Unesco, 1966. "Somalia: The writing of Somali." Paris, August.
- Shire Jaamac Axmed, 1966-1967. "Iftiinka aqoonta", La Stamperia Nazionale, Mogadishu.
- Hussein M. Adam, 1969. "A Nation in Search of a Script: The Problem of Establishing a National Orthography for Somali." Master's thesis, University of East Africa, Makarere.
- David D. Laitin, 1977. "Politics, Language and Thought: The Somali Experience, University of Chicago Press, Chicago and London.
- Georgi Kapchitis, 2012. "Nin aan Laga Horreyn"; warqad laga jeediyey xuska sannadguuradii 40d ee Qoraalka Af-soomaaliga, London, Disembar.